

Imtaxaanka Dadaalka ee Aqoonta Luuqadaha (AAPPL)

Denver Public Schools (DPS) waxay aaminsan tahay in luuqadu tahay hanti waxayna qadarisaa kaladuwanaanta dhanka luqada iyo dhaqanka. Waxaan doonaynaa in ardaydu qalin jabiyaan ayagoo ku hadla wax kabadan hal luuqad. Lagasoo bilaabo sanad dugsiyeedkii 2015-2016, DPS waxay bixinaysay barnaamijka Seal of Biliteracy si ay si rasmi ah ugu aqoonsato ardayda sida fiian ugu hadla labo ama kabadan oo luuqadood. Imtaxaanka AAPPL waa dookh uu ardaygu u adeegsan karo cadaaynta aqoontiisa luuqada.



MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

Imtaxaanka AAPPL waa imtaxaan 2 saacadood socda oo kumbuyuutarka lagu sameeyo kaasoo lagu qiimeeyo heerka aqoonta ardayga ee akhirs, wax qorista, ku hadalka iyo dhagaysiga. Imtaxaanka AAPPL wuxuu diirada saaraa Udiyaar Garoowga Caalamiga ah ee Heerarka Barashada Luuqada wuxuuna adeegsadaa warbaahinta maanta jirta taasoo ardayda imtaxaanka gasha ay qabanayaan shaqooyinka sida kaqaybgalka wada sheekaysi muuqaal ah oo rasmi ah, abuurista boostada oonleena ah ee wikis, ayna adeegsanayaa app-yada si ay umuujiyaan awoodooda luuqada. Imtaxaanka waxaa lagu galayaa luuqadaha soosocda: Carabi, Chinese, French, German, Hindi, Italian, Japanese, Korean, Portuguese, Russian, Isbaanish iyo Thai. Imtaxaanka AAPPL waa imtaxaan bilaash ah oo laga qaado ardayda, barnaamijka Seal of Biliteracy ayaana dhiibaaya qarashka imtaxaanada.



XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Ardayda lagama doonaayo inay galaan imtaxaanka AAPPL, hase yeeshee hadii ardaygu doonaayo inuu helo dookh kale oo uu kucadayn karo aqoontiisa luuqada taasoo imtaxaanka kujirta si looga caawiyo inuu qaato shashaadada Seal of Biliteracy waxaa lagu casuumayaa inuu imtaxaanka galo Feebaraayo iyo Maarso sanad dugsiyeed kasta. Wixii laxariira taariikhaha gaarka ah iyo goobta fasalka lagu galaayo intaxaanka fadlan kala xariir wakiilka ama macalinka dugsigaaga si toos ah.



WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Hadii ardaygu qaato imtaxaanka AAPPL, natiijooyinka waxaa loo aqoonsanayaa inay qayb kanoqdaan go'aanka laxariira uqalmida helitanka shahaadada Seal of Biliteracy Gu' kasta oo ardaygu kujiro sanad dugsiyeedkiisa dugsiga sare heerka koobaad iyo heerka sare. Buundooyinka shaqsiga ah ee qayn kasta loomasoo shego ardayda ilaa inay codsadaan maahee.



SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Inaad qaadata shahaadada Seal of Biliteracy waxay ubaahan tahay 3 qaybood:

1. Inad buuxiso shuruudaha Qalin jabinta
2. Inaad cadayso aqoontaada luuqada Ingiriiska
3. Inaad cadayso aqoontaada hal ama kabadan oo Luuqadaha Aduunka ah

Hadii ardaygu galo imtaxaanka AAPPL, buundadaan waxaa loo adeegsanayaa go'aaminta in ardaygu buuxshay iyo in kale shardiga aqoonta Luuqada Aduunka.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirgalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga ama wakiilka si uu kuugu sheego qaabab aad uga caawin karto cunugaaga si wadida kobcinta luuqadiisa uuna udhamaysan karo imtaxaanka AAPPL hadii loobaahdo.

Wixii Macluumaad Dheri ah Booqo Seal of Biliteracy

- DPS Seal of Biliteracy (Shahaadada Labada luuqadood): <http://sealofbiliteracy.dpsk12.org/>
 - Waxaa kujira macluumaad laxariira waxa ay tahay Seal of Biliteracy, faaiidooyinka barashada laba luuqadood, shuruudaha iyo taariikhaha sanadka dhexdiisa ee imtaxaanka laqaadaayo.
 - Imtaxaanka AAPPL: <http://aappl.actfl.org/> waxaa kujira macluumaad kusaabsan waxa AAPPL uu yahay iyo imtaxaanada muraajacada ah ee ardayda.

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.